


# Tiibishada iyo Wisconsin

**Tiibisho**, or ama TB, waa cudur uu keeno jeermis la yiraahdo bakteeriyada *Maaykobakteeriya tuubarkuloosis*. Bakteeriyadu waxay badanaa weerartaa sambabada (TB ah sambabada), laakiin waxay weerari kartaa qeyb kasta oo jirka ka mid ah (TB aan sambabada ahayn). TB waxay ku faafi kartaa markuu qofka qaba TB caadi ah bakteeriyada ku sii qaadsiiyo dadka kale hawada qufac ama hindhiso ka dib. Dadka qaba TB waxaa laga daaweyn karaa haddii ay daawo raadsadaan calaamadahooda ka dib.

Qof kasta oo qaba bakteeriyada TB xanuunku kuma soo baxayo. Dadka qaba infakshanka TB daahsoon kuma xanuunsadaan, ma laha wax calaamado ah, oo ma sii faafin karaan TB. Dadka qaba TB daahsoon waxay u qaadan karaan daawo si aysan ugu dillaacin TB caadi ah.

Waxaa jiray 69 bukaan oo laga helay TB Wisconsin sannadkii 2024. Bukaankaas badankoodu waxay TB ka soo qaadeen meelo ka baxsan Mareykanka ama waxaa qaadsiiyey dad qaba TB caadi ah.



## Celceliska helista

Wisconsin waxaa lagu arkaayey celcelis ah 53 TB sannadkiiba 10kii sano ee la soo dhaafay.



## Iska-caabinta daawooyinka badan

Heerka Wisconsin ee TB u adkeysata daawooyinka badan waa mid ka mid ah kuwa ugu badan Mareykanka, Wisconsin 11 bukaan ayaa laga helay MDR-TB 10kii sano ee la soo dhaafay.



## Dhimashada

Sannadkii 2024, 2 qof ayaa u dhintay TB ama dhibaatooyinkii ay ku keentay.

